Casharka 6

1. Waa maxay bilowgii?
-Bilowgii waa wakhti hore markii Ilaah abuuray wax waliba.

2. Bilowgii, waa kuma kii wax waliba ee dunida yaalla abuuray?
-Waa Ilaah.

3. Maxaa dunida ka jiray intaanu Ilaah wax waliba abuurin?
-Waxba.

4. Haddii aanay waxba ka jirin dunida, muxuu Ilaah isticmaalay si uu kuku uumo dunidatan?
-Waxba ma isticmaalin.

5. Haddaba sidee buu Ilaah dunida ku abuuray?
-Ilaah dunida wuxuu ka dhex abuuray hawo cidla ah.

6. Sidee baa Ilaah ku awooday inuu wax waliba hawo cidla ah ka dhex abuuro?
-Ilaah waa Qaadir.
-Ilaah awooddiisu dhammaad ma leh.
-Ilaah awooddiisu waa mid waarta ama joogto ah.

7. Miyey haddaba awoodda Ilaah xadaysan tahay?
-Maya.

8. Miyaa Shayddaanka iyo jinniyada amase dadku ka xoog badan yihiin Ilaah?
-Maya.

9. Miyaa qofi baray Ilaah sida wax loo abuuro?



-Maya.

10. Maxaanay dadku Ilaah wax ugu sheegi karin, ama bari karin?
-Bilowgii, ma jirin qof ama abuur halkaas joogtay oo Ilaah wax kaga sheegi karta bilowgii.
-Marka dhanka kale laga eego, Ilaah cidna uma baahna inay isaga wax barto.

11. Miyaa haddaba xigmadda Rabbigu xadaysan tahay?
-Maya.

12. Miyaa qofi Ilaah ka xigmad badan yahay?
-Maya.

-Bilowgii, Ilaah wuxuu uumay samada iyo dhulka.
-Bal aynu idiin akhrinno sidii dunidu ahayd ka hor intaanu Ilaah waxba uumin.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:1-2a

1-Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray.
2-Dhulkuna qaab ma lahayn wuuna madhnaa, gudcurna moolkuu dul joogay.

-Sidee baa dunidu ahayd intaan la uummin ka hor?

-Bilowgii, ilays ma jirin.
-Bilowgii, dhulka oo dhan gudcur buu ahaa.

-Miyaad jeclaan lahayd inaad ku noolaato duni aan iftiin lahayn - maalinta?
-Maya.

-Miyaad jeclaan lahayd inaad ku noolaato duni aan dayax ama ilayska bisha lahayn ?
-Maya.

-Miyaanay naxdin badnaateen haddaanay dunidu lahayn ilayska qorraxda?
-Haa.

-Awood uma aadan yeelateen aad ku aragto qofka kale.
-Awood uma aadan yeelateen inaad beertaada abuuratid.
-Welibana ma aadan awooddeen inaad gurigaaga dhisato.

-Bilowgii, dhulka nolol kama jirin.
-Bilowgii, dhulku ma qalalnayn.
-Bilowgii, dhulka ood han biyo ayaa daboolay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:2b

2-Gudcurna moolkuu dul joogay, oo Ruuxii Rabbiguna wuxuu ku dul-dhaqdhaqaaqayey biyaha dushooda.

-Bilowgii, dunida kama aanay jirin nolol.
-Laakiin Ruuxa Qoduuska ah oo ah Rabbi ayaa halkaas joogay.

-Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah ayaa wuxuu dhowrayey inuu bilaabo shaqadiisa, si uu wax waliba ku abuuro.

-Miyaad xussuusataa haddaba inuu jiro hal Ilaah, laakiin noqonaya saddex shakhsi oo isku ah Hal Ilaah?

-Ilaaha Aabbaha ah, Ilaaha Wiilka ah, iyo Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah ayaa wax waliba abuuray.



-Bilowgii, muxuu Ilaah abuuray maalintii kowaad?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:3

3-Ilaahna wuxuu yiri, “Ifiin ha ahaado,” iftiin baana ahaaday.

-Maalintii kowaad, Ilaah wuxuu abuuray iftiin ama ilays.

-Sidee buu Ilaah maalintii kowaad u abuuray ilayska ama iftiinka?
-Ilaah wuxuu iftiinka ku abuuray hadal uu hadla awgii.

-Miyaa qof aan Ilaah ahayn ilays ku abuuri karaa hadal uu hadlo awgii?
-Maya.
-Balse aan halkan tusaale gaaban kuugu siiyo:

-Kaba soo qaad in habeen habeennada ka mid ah habeenku kuugu soo galo duurka adigoo aan toosh amase faynuus aan wadanin.

-Kaba soo qaad inaanu dayax iyo xiddigaba lahayn
-Dhulka oo dhan wuxuu noqonayaa mugdi, oo waxba arki kari maysid.

-Miyaad haddaba intaad hadasho oran kartaa, "Iftiin ha ahaado," oo iftiinkiina imanayaa?
-Maya.

-Ilaah, haddaba, wuu hadlay, oo iftiinna waa la abuuray.

-Haddaba, sidee buu Ilaah ku ogaaday sida loo sameeyo iftiinka?

-Ilaah wax waliba wuu garanayaa.
-Ma jiraan wax Ilaah aanu garanaynin.

-Miyey Ilaah ku adag tahay inuu ilays abuuro?
-Maya.

-Maxaa u sabab ah?
-Ilaah waa Qaadir.
-Ma jirto wax aanu Ilaah samayn karin.

-Sidee buu Ilaah u arkay iftiinkii uu abuuray?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:4a

4-Ilaahna wuxuu arkay in iftiinku wanaagsan yahay.

-Haddaba iftiinkii Ilaah abuuray wuu wacnaa.

-Waxaa taas ugu wacan in Ilaah kaamil yahay.
-Wax kastoo Ilaah sameeyo waa kaamil.

-Dadku waxay mararka qaarkood sameeyaan guryo, guryihii ay sameeyeen ayaa mararka qaarkood biyaha soo daaya.

-Habluhu waxay sameeyaan dheryaha iyo caashuummada, laakiin mararka qaarkood dheryaha ay sameeyaan haddana way jabaan ama burburaan.

-Laakiin Ilaah wuxuu wax waliba u abuuray si kaamil ah.
-Maxaa sabab u ah?
-Waayo Ilaah waa kaamil.



-Muxuu Ilaah sameeyey kaddib markii uu iftiinka sameeyey ama abuuray?

Bal aynu akhriyo Bilowgii 1:4b-5

4-Ilaahna iftiinkii ayuu ka soocay gudcurkii.
5-Ilaahna wuxuu iftiinkii wuxuu u bixiyey Maalin, gudcurkiina wuxuu u bixiyey Habeen. Waxaana jiray fiid iyo subax isla maalin ah.

-Markii Ilaah abuuray iftiinka, Ilaah gudcurkii oo dhan.

-Ilaah qaar ka mid ah gudcurkii ayuu ka dhigay habeen.

-Maxay noqon lahayd haddii aanu Ilaah ka tegi lahayn qaar ka mid ah gudcurkii qirada weynaa?

-Suuragal nooma noqoteen inaynu habeennimada seexanno.

-Ilaah wuxuu qaar ka mid ah gudcurka u soo reebay si aynu u awoodno inaan seexanno habeennimada.

-Wax waliba ee Ilaah sameeyo haddaba waa kaamil.

-Muxuu Ilaah abuuray maalintii labaad?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:6-8

6-Ilaahna wuxuu yiri, “Meel bannaani ha noqoto biyaha dhexdooda, oo iyadu biyaha ha ka soocdo biyaha.”
7-Markaasuu Ilaah sameeyey meeshii bannaanka ahayd, oo wuxuu biyihii bannaanka ka hooseeyey ka soocay kuwii

bannaanka ka sarreeyey; sidaasayna ahaatay.
8-Ilaahna bannaankii wuxuu u bixiyey Samo. Waxaana jiray fiid iyo subax maalintii labaad.

-Maalintii labaad, Ilaah wuxuu abuuray Samada.

-Sidee baa Ilaah samada u abuuray maalintii labaad?
-Ilaah wuxuu samada ku abuuray Hadalkiisa.

-Miyey haddaba Ilaah ku adkaatay inuu Samaa abuuro?
-Maya.

-Maxaa sabab u ah?
-Ilaah waa Qaadir.
-Ma jirto wax Ilaah aanu samayn karin.

-Sidee buu Ilaah ku kala dhaqaajiey biyihii dhulka daboolay?

-Ilaah wuxuu qaar ka mid ah biyohii dhulka geeyey meel samada ka shishaysa.

-Ilaah wuxuu qayb ka mid ah biyihii ku dhaafay dhulka.

-Muxuu haddaba Ilaah abuuray ama sameeyey maalintii saddexaad?

Bal aynu akhriyo Bilowgii 1:9-10

9-Ilaahna wuxuu yiri, "Biyaha samada ka hooseeya meel ha isugu soo urureen, oo ciidda engegani ha muuqato." Sidaasayna ahaatay.
10-Markaasuu Ilaah ciiddii engegnayd u bixiyey Dhul;



ururkii biyahana wuxuu u bixiyey Bado; oo Ilaah wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay.

-Maalintii saddexaad, Ilaah wuxuu abuuray dhulkii engegnaa.

-Yaa amray biyaha gadaal u noqdaan si dhulkii engegnaa u muuqdo?
-Ilaah.

-Maxaa Ilaah biyaha ugu amray inay gadaal u soo noqdaan, oo biyuhuna adeecaan?
-Waayo Ilaah baa biyaha uumay.

-Haddii qofi ku yimaado webi socda, miyuu awoodayaa inuu webiga ku amro inuu gadaal u laabto, si qofku biyaha kaga gudbo?
-Maya.

-Maxaa kale ee Ilaah abuuray maalintii saddexaad?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:11-13

11-Ilaahna wuxuu yidhi, "Dhulku ha soo bixiyo, doog, iyo geedo yaryar oo iniino dhala, iyo geedo waaweyn oo midho caynkooda ah dhala, oo iniinahoodu ku dhex jiraan, oo dhulka ku kor yaal." Sidaasayna ahaatay.
12-Dhulkiina wuxuu soo bixiyey doog, iyo geedo yaryar oo leh iniino caykooda ah, iyo geedo waweyn oo midho dhala, oo iniinahoodu ku dhex jiraan, iyaogoo caynkooda ah, Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaaagsan tahay.
13-Waxaana jiray fiid iyo subax maalintii saddexaad.

-Maalintii saddexaad, Ilaah wuxuu abuuray dhirta iyo geedaha.

-Sidii buu Ilaah ku abuuray dhirta iyo geedaha oo dhan?
-Sidee baa Ilaah u abuuray dhirta iyo geedaha oo dhan?

-Ilaah wuxuu dhirta iyo geedaha ku abuuray hadalkiisa.

-Miyey haddaba ku adkaatay Ilaah inuu dhirta iyo geedaha abuuro?
-Maya.
-Maxaa sabab u ah?
-Ilaah waa Qaadir.

-Ma jiraan wax Ilaah aanu samayn karin.

-Ilaa iyo imisa geed iyo dhir kala duwan ayaa Ilaah abuuray?
-Noocyo badan oo aan la xisaabi karin.

-Maxaa Ilaah u abuuray dhirta iyo geedaha?

-Miyaa Ilaah u baahan yahay dhirta iyo geedaha si uu ku noolaado?
-Maya.

-Yuu u abuuray dhirta iyo geedaha oo dhan?
-Ilaah wuxuu dhirta iyo geedaha u abuuray dadka.

-Maxay ahayd sababtii Ilaah u abuuray dhirta iyo geedaha?
-Waayo Ilaah wuxuu aad u jecel yahay dadka.

-Haddii aanay geedo jiri lahayn, miyaad guri dhisan kari lahayd?
-Maya.

-Haddii aanay jiri lahayn gallay, ama masaggo, maxaad cuni



lahayd?

-Ma badna waxa la cuni lahaa haddaan masaggo iyo Gallay la helaynin amaan la arag.

-Ilaah wuxuu geedaha u abuuray ayaa waxay tahay inuu ina jecel yahay.

-Muxuu haddaba Ilaah abuuray maalintii 4aad?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:16-19

16-Oo Ilaah wuxuu sameeyey labada iftiin ee waaweyn; si uu iftiinka weynu u xukumo maalinta, iftiinka yaruna u xukumo habeena; oo xiddigahana wuu sameeyey.
17-Ilaahna wuxuu iyaga dhigay meeshii bannaanayd oo samda dhex ahayd si ay dhulka u iftiimiyaan,
18-oo ay u xukumaan maalinta iyo habeenka, oo ay iftiinka uga soocaan gudcurka. Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay. Oo waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii afraad.
19-

-Maalintii afrad, Ilaah wuxuu abuuray qorraxda, dayaxa, iyo xiddigaha.

-Haddaba miyaa Ilaah abuuray qorraxda, dayaxa, iyo xiddigaha?

-Ilaah wuxuu abuuray, qorraxda, dayaxa, xiddigaha isagoo hadalaya.

-Maxaa qorraxda, dayaxa, iyo xiddiguhuba aanay cirka uga soo dhacaynin?

-Waayo Ilaah baa halkaas ku adkeeyey.
-Waayo weliba shuqullka Rabbigu waa kaamil.

-Maxaa Ilaah uumay maalintii shanaad?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:20-21 & 23

20-Oo Ilaah wuxuu yidhi, Biyuhu aad ha u soo bixiyeen uun dhaqdhaqaaqa oo badan, oo naf nool leh, haadduna ha duusho dhulka dushiisa xagga meeshii banaanayd oo smada dhex ahayd.

21-Oo Ilaah wuxuu abuuray nebiriyada badda oo waaweyn, iyo uun kasta oo nool oo dhaqdhaqaqaaqa, ee biyuhu aad u soo bixiyeen iyagoo badan, oo caynkooda oo kale dhala, iyo haad kasta oo caynkiisa dhala; Ilaahna wuxuu arkay in taasu wnaaagsan tahay.

23-Oo waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii shanaad.

-Maalintii shanaad, Ilaah wuxuu abuuray mallayga ama kalluunka iyo haadka hawada.

-Sidee baa Ilaah u abuuray kalluunka badda oo dhan iyo haadka hawada?

-Ilaah wuxuu ku uumay Kalluunka badda iyo haahda hawada hadalkiisa awgii.

-Miyey ku adkaatay Ilaah inuu abuuro kalluunka iyo Haadda?
-Maya.
-Maxaa sabab u ah oo ay ugu adkaan weyday?
-Waayo Ilaah waa Qaadir.

-Haddaba, ma jiraan wax Ilaah aanu samayn karin.



-Ilaa iyo imisa kalluun iyo Haad ah oo kala nooc ah ayaa Ilaah abuuray.
-Ninna ma xisaabi karo.

-Maxaa Ilaah u abuuray kaluunka iyo Shimbiraha oo dhan?

-Miyaa Ilaah u baahan yahay Kalluunka iyo shimbiraha, si uu ugu noolaado awgeed?
-Maya.

-Yuu Ilaah u abuuray kalluunka iyo shimbiraha ood han?
-Ilaah wuxuu kalluunka iyo shimbiraha u abuuray dadka.

-Maxaa Ilaah u abuuray Kaluunka iyo Haadka ood han?
-Wuxuu u abuuray waxaa weeye in Ilaah dadka aad iyo aad u jecel yahay.

-Muxuu Ilaah ka yiri wax waliba ee uu abuuray oodhan?
-Ilaah wuxuu yiiri, wax waliba ee uu abuuray way wanaagsanaayeen.

-Maxaa Ilaah u awooday inuu wax waliba kaamil ka dhigo?
-Waayo Ilaah waa kaamil.

-Wax waliba ee Ilaah abuuray bilowgii kaamil bay ahaayeen.

-Bilowgii, geed qodxan leh ma jiri jirin.
-Bilwogii, cagaar wixii la beerto ka soo hoos dhalanaya ma jirin.
-Bilowgii, badarka oo dhan si wacan buu u bixi jiray.

-Ilaah wuxuu wax waliba u abuuray si kaamil ah, waayo aad iyo aad buu inoo jecel yahay.